# JIIFINTA ISBITAALKA SIDII DAAWEYN LOO BIXIYO

(Qaybta 3 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca qofta mas'uul ka ah xannaanadaada ("takhtarka mas'uul ka ah") | |
| 3. Magaca qaybta iyo isbitaalka | |
| 4. Taariikhda uu bilaabmey xabsiga sida u qabo Qaybta 3 | |

## Waa maxay sababta aan isbitaalka la ii jiifiyey?

Waxaa isbitaalkaan lagugu xiray sida u qabo qaybta 3 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983. Waxaa kani loola jeedaa in takhtarkaagu u maleeyo inaad qabtid xaalad maskaxeed iyo inaad u baahan tahay in isbitaalka lagu jiifiyo sidii xannaano iyo daaweyn laguu siiyo.

## Ilaa gormee ayaa halkaan joogi doonaa?

Waxaa halkaan lagugu hayn karaa marka koowaad ilaa lix bilood sidii laguu siiyo daaweynta aad u baahan tahay.

Waa inaadan ka tegin isbitaalka waqtigaan aysan ahayn haddii qofka mas'uul ka ah xannaanadaada (takhtarka ku xannaaneeyo) kuu fasaxo inaad iska baxdo mooyee. Haddii aad isku daydo inaad isbitaalka ka baxdo shaqaalaha ayaa isku dayi doono inay ku joojiyaan, markii aad baxdana, waa lagu soo qaban karaa iyo lagu soo celin karaa.

## Maxaa dhacayaa oo xigo?

Takhtarka mas'uul kaa ah ayaa kuu sheegi doono markii aad fiican tahay iyo diyaar u tahay inaad isbitaalka ka tagto. Haddii takhtarka mas'uul kaa ah u maleeyo inaad u baahan tahay inaad isbitaalka joogto in ka badan lix bilood, waxay cusboonaysiin karaan ilaa lix bilood oo kale waqtiga aad isbitaalka joogi doonto, waqtigaas ka dibna waxaa lagugu hayn karaa ilaa hal sano markiiba. Takhtarka mas'uul kaa ah ayaa kani kaagala hadli doono markii la gaaro gaba-gabada waqti walba.

